

NAFTAYDAAY
imaqal
qora:zahra ciise mohammed{bint ciisa}

NAFTAYDAAY IMAQAL

Qoraa

ZAHRA CIISE MAXAMED

HORDHAC

hubaal qofwalba oo inaga mid a wuxu leeyahay hab nololeed isaga ugaar ah balse waxa jira waxyabo aanka simanahy oo si iskumid ah inagu dhaca inagoo anan garanayn sababaha ay waxasi ku yimadan hadana badana waxan nahy kuwo ku qanacsan sheeyada,

oo waxa nahay kuwo qadarta rumaysan.

alle ayay mahad usugnatay oo inaga dhigay kuwo muslimiin ah lakiin hadadba rumaysneen qadarta muslimnimadadu faaiido malahan.

Ugu horeen buugan yar waxan ugu hadli doona waxyabo malinkasta si joogto ah inagu dhaca inagoo aanan garanayn sababeheeda.

Balse waxa jira waxyabo aan awoodno inan kahor tagno oo aan joojino kuwaso nafafkeena dhibateeya mararka qaar,

Asliyan ba dhaliinteena waxa jira sheeyo aad dhibato ugu ah balse anay isku dayin xata inay waxyar kahortagaan.

Almuhiim hadal iyo dhamantii kuso dhawow buugyar oo awooda inuu badalo nafsadadan qalafsan oo awooda inuu badalo qofkan manta jooga ee aan awoodin dhiirigalin nafeed inuu isgaliyo,

Kusoo dhawow aqriste nolosha aqriska!!

“HA ORAN NAFTEYDAAY WAXAN MADHICI KARAN, WAXWALBA WAA ISKU DAY EE ISKU DAY...!!”

Waxan aragna waxyabo badan oo markan dusha ka arkeeno umuuqda kuwo aan laheen qabasho lakin xaqiiqdoda aytahay inay kafududyihiin waxa aad adiga u maleyso inuu aduunka ugu fudud yahay,

Marar badan ayan maqalna ISKUDAY lakin waxba kama soo qaadno

Kaasi kaliya waxan uhaysana inuusan waxba eheen uuyahy hadal un

Lakin xaqiiqda ereygas wayka weentahy xaraf ahantiisa.

Hadad manta isku daydo shey aad moodi jirtay inuusan qof qaban Karin, oo mar labad barina isku daydo xaqiiq sheyga wuxu aktada kanoqonaya mid ka fudud culeeska baalka buuga!

“NAFRAYDAAY IMAQAL QOFNA HAKU NOQON CULEES, MAXA YEELAY WAXYABAHA CULUS WAKUWO LADHIBSADO…!!”

Naftaaydaay qofkasta oo ku qiimeya kuna dhigaa booskad u qalantay qofkasi asagana dhig halku ku dhigay, balse kan aan ku arag xata inad nooshahay asagana isaga dhig mid aanad arkinba.

Qof inaad culeesku noqota wxay kamid tahay waxyabaha naftada hoos udhiga ku keeni kara, qofna haku tiirsan in badan sababto ah waxa laga yaba tiirkas inuu jabo.

Naftaydaay noqo mid isku filan xillikasta oo hau bahan qofan Alle wayne eheen, hubaal hadad dadka ubahato wxay kuu arki doonan inaad liidato.

“NAFTAYDAAY IMAQAL BARO ADIGA QOFKA AAD TAHAY”

Inaad barata adiga shaqsiyadada waa mid kaadhigi karta qof guulestay oo garay hormaraduu hiigsanayay, malinta aad usoo jeesatid inad barato naftaada waa malinta aad noqondoonto qof ka adag kan manta aad tahay,

Hubaal hadanad adigu is aqoon sided u sugaysa inay dadku ku bartan macquul ma’ahan inay taasi dhacdo haa macquul ma’ahan!!

Adiga is baro kadibna dadka ayagaba si fudud ku barandoonan qofka aad tahay, aduunyadan dusheeda waxa kunool kuwo badan oo aad taqanid lakin aynan adiga ku aqoon mais waydiisay maxay ku baran wayeen!?

Haa kuma barankaran! Maxayeelay adigaba ma tihid mid is aqana adiga baro naftada kadib wayku barandoonan.

“NAFTAYDAAY IMAQAL NOQO MID MUUQATA MEELKASTO AAD JOOGTO”

Hadanad awoodin inaad dadka kadhexmuuqato ogow illa hada matihid mid naftiisa siiyay kalsooni, waxa jira kuwa badan oo markay dadku ku dhexjiraan muuqda sifo walba haku muuqdane, ogow kuwasi waa kuwo bartay naftooda iskana dhigayna qofkay doonayeen inay noqdaan,

Hadad tahay mid leh waxyabo u qarsoon hadana anad awoodin inaad dibada usoo sarto ogow sheeyadas kugu qarsoon inay yihiin kuwii dadka kaadhex muujin laha,

Iskuday sheeyadas inaad dibada usoo sarto siaad ugu dhigto kuwa xaqiiq ah aadna unoqoto mid muuqda.

Maiswaydiisay kuwa noloshooda guulkagaray ee hadaf yadooda xaqiijiyay

maxay sidaas unoqdeen? oo sidayna kusoo sareen waxa iyaga ku dhex qarsoona!?

Aniga kaga jawabayo iyaga waxay fahmeen faraska gudahooda ka dhex qaylinayo jihada uu usocdo….!

Adigana ogow faraska gudahaga kujira jihadiisa.

“NAFRAYDAAY IMAQAL MARARKA QAAR UMUUQO MID DACIIF AH SIAAD U OGAATO KUWA KU DHAGRAYA!”

Mararka qaar inaad daciif aan waxba qaban Karin inaad iska dhigta waxay kacawinkarta inad kala barato kan saxibka ah iyo kan cadowgaga ah.

Saxibadeen waakuwa kaliya ee aan awoodin inan u wajahno sitoos ah maxayelay waxay boos ku leeyihiin anaga qalbiyadeena, tasi darted ma awoodno iska difacidooda.

Halka sabab ee kaliya aan isaga difaaci karno waa inan marka hore ogana saxibka saxda ah iyo kan faalsaha ah, arinkaa kadib waxaynu awoodna inan kala sarno saxibkeen iyo cadowgeena.

“NAFRAYDAAY IMAQAL HANOQON DANEESATO ILLOWDA KUWII CAAWIYAY XILLIYADA DHIBATADA”

Kuwa nacaawiya xilliyada aan kujirno dhibatooyinka adag waa kuwa saxda ah ee u qalma noloshada inay boos kuyeeshan, iyaga waxay garab ku ahayeen xilliyada aad eheed naflayasha kan ugu liita gacanta ayaykaso qabteen wayku sare istajiyeen waxay ku tuseen wadada saxda ah waxayna ka dhigeen mid adag.

Wayahe ma iisheegi karta sababta aad u illabaysid kadib markaad noqotay mid isku filan…!!?

Sidii markii aad dhibataysaneed aykugu ahayeen tiir adigana markad adkatay u noqo darbi adag oo ay cuskadan.

“NAFTAYDAAY IMAQAL HAL EREY UU QOFI DHAHY YUUSAN KAA DUMIN QASRI AAD IN BADAN DHISEESAY!”

Mararka qaar anago faraxsan waxa dhacda inuu qof hadal yar uu iska yiraahdo anagana hadalkas uu nagu reebo saamen balaran, xita hadalkas yari mararka qaar wuxu dumiyaa riyooyin aan inbadan ku dadalaynay dhisidooda.

Yuusan ku saamen hadal uu qofi dhahay xita hadad si buuxda u ogtahay hadalkas ujeedkiisa inuu adiga kuugu socday, isaga dhig sidii inaadan maqlin oo kale.

“NAFTAYDAAY IMAQAL MARNABA HAEEGIN QOFKAA WAXUU HAYSTO EE KUMASHQUL ADIGA WAXAD HAYSATID”

Badana arintan marar badan ayay nafaheena kuso laalabata waxana sabab u ah ma aragno waxan anaga haysano ee uu qofkaasi haysan, hubaal sheyga aad isleedahay qofkaas wuu haysta adna mahaysatid waxa laga yaba inad haysatidba mid kawanagsan kan uu isagu haysto.

Haeegin qofkaasi ee adiga eeg naftada, haisdhihin kaasi wuuka quruxbadan yahay, rumeyso naftada wadka quruxbadantahay qofkasta oo dunidan kunool ha waadka quruxbadantahy…!!

Usheeg naftada inaad haysatid waxkasta uu qofkasi haysto ku kawanagsan.

“NAFTAYDAAY IMAQAL HAU JOOJIN QOF DARTIIS WAXAD INBADAN KU HAMINAYSAY”

Mararka qaar waxa nagu dhacda inan wayno doorasho ookaliya aan haysano hal doorasho, xilligaas waa xilliga lagaga bahan yahy inaad dibada uso saartid go’ankaga saxda ah iyo adkeysigagi ku qarsoona nafsadada, qof aad kugu dhow inu kugu xira doorasho an la awoodin xanunkeeda in lacabiro waa qayb kamid ah nolosha hau joojin qofkas dartii wax aad inbadan ku haminaysay helidiisu maxa yeelay doorashada aad xilliga sameysay waxa laga yaba inay kaa dhigto mid ka duwan kan hada aad tahay.

Haka baqan wixi dhici doona ee uwajah si toos ah.

“NAFTAYDAAY IMAQAL MARKASTA OO AAD CAQABAD HORTADA TALO KA MEERESATO WAJAHIDEDA OGOW INAD NOQONAYSO MID AANMEESHIISA KA DHAQAQIN”

Xaqiiqda iga maqal hadad caqabadahaga wajahi waydo madhafi doontid meesha aad hada tagan tahay,

oo waadka baqan doonta inad dhaafto wabiga gadiga aadka tagantahy magaraysid dhinaciisa kale illa aad wajahdo qabowga biyaha iyo xayawanada kujira wabigaa…!

Marba hadad usoo qalab qadatay wajahida dhibatoyinka ku hortagan majiro shay awooda inuu dib kuu dhigo illa qadarta mooye,

- ✓ Sida darted uwajah caqabadaha si iska hor imasho leh oo dhabarka hau jeedin.

“NAFTAYDAAY IMAQAL NOQO MID AAMUSAN XILLIYADA AY DADKA MURMAAN”

Inaad aamusta mararka qaar aad ayay u adagtahay oo ma awoodno xaqiiqdi, laakin aamuska wuxu naga caawiya waxyaalo badan oo nolosheena ku Saabsan

Kuwa aamusnanta badan waakuwa aan la awoodin in lafahmo ujeedkoda oo mala qiyasi karo waxay sameen karan, marba hadii ay dadku qiyasi karan ficilkaga ma tihid mid leh awooda nafeed oo dhameestiran.

Mararka qaar aamusku mafiicna waa sax lakin hanoqon qof maanto dhan iska hadla.

kan hadalka badan dadka dhexdooda kuma lahan boos dhameestiran.

“NAFTAYDAAY IMAQAL QOFNA HAUGA FOGAAN SABABYAR OO ANAD OGEEN SALKEEDA”

Waxyabaha qaar waxay umuuqdan iyo salkooda waa kuwo kala fog mararka qaar waxyabo aan indhaheena ku arkeeno aya noqda kuwo aan raadlahen lakin cadi markan uarkeeno noola muuqda kuwo xaqiiqo ah.

Hubaal qalad wuu dhaca lakin qalad waxa ugu wanagsan kan dib laga saxo oo lahagajiyo, waxwalba oo sax kula muuqdan haracin illa aadka ogato salkooda.

Waan huba waxa jira waxyabo badan oo ad kufududatay sameentoda lakin manta kadib kadigtonow wax walba oo aad qabanaysid ama aadku hadlaysid, hadad aktaada kafududa aya laga yaba Inuu burburiyo qof dhan riyooyinkiisi, sida darted xakame ereyada afkaga kaso baxayo inta aysan dhawicin dadka kale qalbiyadooda.

"NAFTAYDAAY IMAQAL QOFNA HAJARIN SAXIBTINIMADIISA ADIGOON OGEEN QATARTA CADOWTINIMADIISA!!"

Saxibkaga noloshado dhan saxiblaga ayuu ahana lakin waa ay yaryihiin kuwa dacada ah, qof aad asxab ahaydeen hajarin/hagoynin saxibtinimadiisa maxayelay qofkaas waxa uu ogyahay waxyabo badan oo noloshada ku saabsan, waana qatarta ugu ween ee uu qofi yeelankaro, wuxu ogyahy meelahad kajilcantahy sidookale waa mid og waxa kuxanuunjiya iyo waxyabaha nafsadada ayxiiseso.

- Waa suaale sided uwajahi karta qofkas haya dhamaan xog kasta oo noloshada ku saabsan oo cadowga shisheeyaha uu raadiyo si uu kugu so wajaho!?sideed ku awooda wajahidiisu?

Jawabtada wxay noqonaysa ugu yaran ma awoodno inan wajaho.

Tamam hadanad awoodin marka horayba maxad cadow uga dhiganaysay, ha cadow haka dhigan saxibka siaanad ubaabi'in.

“NAFTAYDAAY IMAQAL QOFNA YUUSAN AWOODIN INUU KU LIIDO OO MADAXAGA HOOS HAGAYN “

Waxa jira kuwo badan oo sugaya malintad dhulka ku dhici laheed oo aad noqon laheed mid liita, waxa jira asxaab badan oo manta kuu mujinaya saxiibtinimnadoda lakain xaqiqda gudahooda ku qarsan ayka duwan tahay waxa ayku muujinayaan.

Hubaal sidookale waxa jira cadow aad leedahay oo kuu muujiya inay ku necebyihiin kuwaasi waxay ka wangasan yihiin saxiibada beenta ah ee dhabarka ku aadiya marwalbana ka soo horjeeda adiga guushada.

- Marba hadii qof uu awoodo inuu xakameeyo adiga dareemahaga, iska illali qofkas in kabadan intaad cadowgaga iska ilalinaysid!!

“NAFTAYDAAY IAMQAL NOQO MID ALLE MARWALBA KU XIRAN”

Majiro shey kawayn inaad tahay qof marwalba alle ku xiran oo alle la leh xiriir hagagsan, badankeen manta maxasuusano alle waynidiisa illa aan wayno wax aan haysanay!!

maxasuusano naxariis badanihii ina abuuray nagana dhigay kuwo wax ku ool ah, maxasuusano allihi nala jiray xilligan murugada ku sugneen, xilligan mugdiga dhex dabalanaynay.

Kama xishoonaysid miya alle inaad soo xususato bas xilligad dhibataysantahay!?

Kama xishoonaysid miya alle inaad hor istagto adigoo xasuusan wayay kadib murugadadai, adigoo xasuusan wayay umahad celin tiisa, kama xishoonaysid miya in alle uuku caroodo!??

- YARABI HAINAN LUMIN KADIB HANUUNKENA.

"NAFTAYDAAY IMAQAL MARNA HAKA LEEXAN WADADA XAQA AH"

Maalin ayan ka leexday muslim la dhibatenayo anigoo awooda inan wax u qabto!

Malin ayan ka aamusay qof xaqiisa anigoo awooda inan sheego xaqiqda!

Malin ayan dhabar jeediyay walal iwaydistay cawinad anigoo awooda wax kasta inan ku caawiyo!

Malin ayan indhaha laabtay anigoo awooda inay indhahaygu noqdan marqaati sax ah!

Dib ayan ujaleecay waxyabaha aan falay waliba anigoo ka shalaynaya sababtan u sameeyay.

Walal waan ogahay malin un inaad fashay fal wadada xaqa ka leexday, waan ogahay

inaad is tidhi “way adkanayan mar hadad faraha la gashid”.

Lakiin taas waad ku qaldaneed, xaqa haka leexan xata hadii dunidoo dhan kaso hor jeesato, xata haday doonan inay ku dilan marna haka leexan wadada saxan, haka aamusin xaqa adigoo awooda inaad hadasho, marna ha dhabar jeedin adoon alle oo la dulmiyay oo doonaya adiga cawinadada.

Ha quursan mid kuwaydiiyay wax aad awoodo inaad siiso, maxa yeelay majiro wax dunidan dusheeda ku warayo.

- WAXWALBA CARO AYAY AHAYEEN CARO AYAYNA KU LABANAYAN!!

“NAFTAYDAAY IMAQAL NOQO MID JOOGTEYSA AQRINTA KALAMKA ALLE”

Nafyahay maqal waxan joogna xilli dadkii dunida ku noola badankood ay ilabeen wajibadkooda, waxan joogna xilli ay joogan dad ka duwan kuwii hore, waxan joogna xilli aysan jirin qiimeen nafed oo qof la siinkaro, waxan joogna xilli aanad xata ku kalsonan Karin walalkaga adiga kula dhasahy.

Hadad noqotid mid joogtaysa aqrinta quranka waxad heli doonta daganasho ka xoogan mida hada haysatid.

Kalamka alle wuxu dajiya qalbiyada ay naafesay murugadu, wuxuu xasiliya nafta ku daashay beenaha ku hareeresan.

Sidookale waxuu dajiya qalbiyada ay gilgileen khiyanada, qalbiyada illoben in ay xaq u leeyihin farxad dhamestiran inay helan.

- SAAXIBKAYOW MARNA HAKA TAGIN INAAD AQRISID KALAMKA ALLE, SIAAD U HESHO DAGANAN DHAMESTIRAN.

“NAFTAYDAAY IMAQALWAY ADAGTAHAY WAAN OGOHAY LAKIN ADKAYSO”

Waxa jira sheeyo inagu adag oo aan awoodin inan u wajahno sida ugu saxsan, lakin waxwalba dhanka alle ayay ka qoranyihiin haillabin,

Hailaabin in aad tahay adoon alle, allena uu awoodo inuu kasaro xaladaha adag, sidookale hai laabin inuu jiro mid kuujeda xata haday dadkoo idil ku arki wayan oo indhahoga ayka qarsooman adiga indhahaga, ha ilabin in aduunkan uusan jirin qof hal xalad ku sugan.

Ibnu qayim wuxu leyahay

“farxad ma dareemo qof aanan murugoomim, macan ma arko qof anan sabrin, naciimo aduun ma dhadhamiyo qof aanan dhibatoonin, raaxo ma arko qof anan daalin, qofkii daalo aya raxaysto”

“NAFRAYDAAY IMAQAL MUHIIM YAYSAN KUU NOQON QOFKA HADALKAGA AAMINAYO KALIYA MUHIIMADA SAAR DHAB AHANTA HADALKAGA”

Muhiim ma ahan inuu jiro qof adiga si taxadar leh kuu dhagesanayo, toban qof ama kabadan hadii aad wax u sheegaysid kolay walaga dhex hela qof kuu dhagesanayo sida kugu haboon.

Lakin dhab ahanta hadalkaga aya ka wanagsan inay ku dhageestan, hadiiba uu jiro qof ku dhagesanayo qofkas waa inaad siisa xog saxan ama hadal saxan oo dhab ah.

Maxa yeelay qofkan wuxu dareemihiso dhan kugu soo jeediyay si uu kaga helo hadalyar oo wanagsan xata culeeskiisa yuusan garin culeeska quranjada oo kale, kaliya waxa muhiim ah hadalka yar ee aad u sheegeysid inuu saxan yahay.

Oraah aya waxay leedahay muhiim iima ahan in hadalkayga la aqbalayo oo laigu racsan yahay lakin waxa muhiim ii ah inuu run yahay".

"QOFKII MANTA DIIDA NASEEXADA BILAASHKA AH, BARI AYUU KU QASBANADA IN UU DHAYMAN IYO DAHAB KU GATO SHALAYTADA"

“NAFTAYDAAY IMAQAL HAKU LUMIN DAARTAN HORE MAXA YELAY WAXA DAMBEYSA DAARTII WAARITANKA”

Alle {swt} mararbadan ayuu quranka dhex diisa inoogu waramay meesha uu noqodkeenu ahaday, wuxuu inoo cadeyay dunidan inaytahay kaliya xiisad yar oo aad imtixan ku jirtay kadibna lagasoo sari doono hadad noqotid mid kubasa imtixankas uu alle kuu cadeyay meesha aad ku sugnan doontio, sidokale hadii aad ku dhacdana uu ku cadeeyay meesha uu hooygagu ahadey.

Balkawaran adigoo og inad imtixan kujirtid hadana lagu siiyay jawabaha sualaa imtixanka, laguuna sheegay abal marintada!

Maxad fali laheed!? Mawaxad dhihi laheed ani mau baahni jawabaha sualahan, kawaran adigoo heysta sual walba jawabteeda hadii aad dhiibtid warqadoo cadan ah maxadka filanaysa imtixankas natiijadisa!?

Ma’ adaa is riday mise walagu riday??

Shaki la’aan ada is riday malintaas wayn eeku sugayso haisa seejin ee ushaqeeso, hubaal darbiyada cuksan laheedna alle ayaa kuusi dhisay kaliya un dhaqaaq.

“NAFTAYDAAY IMAQAL SHAY DIIRADA HASARAN ILLA XAD AAD XAKAMEEN WAYNDO INAAD JOOJISO”

Waxa jira caadoyin uu qof kastaba leeyahay, lagayaba xata inaad ledahay cadoyin xun.

Jooji hadii ay yara jiraan caadoyin aad leedahay adiga ahan wad leedahay cadooyinkaso kuula muuqdan kuwo qalafsan.

Waxa jira sheeyo aad la qabsatay malinkasta joogto ahan inaad u sameysid, kuwaso xata malin aanad katagin, waakuwaas kuwa aan ka hadlayo haday wanagsan yihiin horay usii wado lakin hadii aad is leedahay faaiido kuma lahan iska daa oo meesha ku jooji.

- Sheey aad si joogto ah u sameeysa wuxu kuu noqda balwad oo kale sheyada wanagsan ka dhigo kuwa kula jira.

"NAFTAYDAAY IMAQAL ILLALI WAQTIGAGA INKABADAN INTAD INDHAHAGA ILALISO!"

Waqtigu waa shayga kaliya ee uusan qofku xakameen Karin, isagu qofna ma sugo hadad ka faaidesan waydo waa siduu kugu dhafay dibna uma soolabto!

Ilbiriqsi kasta oo macno daro kaga taga ogow inuu ka mid yahay adiga cimrigaga, sacad kastoo ku dhafta yaqiinso inay soo dhabenayso adiga ajashaada, malin kasto na dhabar jeedisana ogow inaad kusii dhabanayso malintad gurigaga saxda ah aadi laheed!

BAL IN YAR AAN DIB UGU LABANO QARNIYADI TAGAY IYO TAARIKHDA SHEIKH KAMID AH CULIMADA HORE QAAB ILLALINTA WAQTIGIISA.

Ibnu caqiil waxa uu aha caalimki lagu magacabi jiray CALI BIN CAQIIL AL-XAMBALI, waxa uu aha shekhi ibnu jowsi.

Culimadii taarikhdiisa kawaramay waxa kamid aha IBNU RAJAB AL-XAMBALI, waxa uu taarikhda ibnu caqiil kaga waramay kitaabkisa la yiraahdo {DAYLU DABAQAATILXANAABILA}, ereyada uuka dhahay waqtiga hadii aaynu eegno wuxuu yidhi;

“hadaan ahay ibnu caqiil xaran waxa iga ah inaan saacad cimrigayga kamid ah dayaco, ama ay ciyaar igaga lunto, xataa hadii uu carabkaygu naafoobo oo aan wax aqriska awoodi wayo, indhahayguna ay araga daayan, qalbigayga Ayaan waqtiga kaga faaidesanaya oo damiirkayga Ayaan ku mashquulinaya inuu ka fikiro koonka aan kunool nahay iyo awoodaha illahay, waxa kale oo hadalkiisa kamid aha

“labaatan jirka markaan aha xiisahan u qabay cilmiga mid kabadan Ayaan u qaba

imika iyadoo da’daydu ay tahay 80 jir” markalena waxa uu yidhi;

“wax illahay loogu dhawado oo waqtiga lagu dhameeyo waxa ugu wanagsan barashada cilmiga”

Intaas waa ibnu caqiil sidu waqtigiisa ugu illalin jiray inay ka lumiyan sheyo aan faido ulaheen kawaran dadka manta nool sideey tahay xaladoodu!?

49 jirkii 100ka kitaab qoray

SHEEKH MAXAMED JAMALUDIIN AL-QAASIMI, waxa uu dhasahy 1862m waxanu dhintay 1911m, cimrigiisa markii uu dhimanayay waxa uu aha 49 jir sheekh la dhihi jiray CAASIM AL-BAYDAAR, oo aqoon u laha ayaa wax ka qoray taarikh nololeedkisi waxaanu yidhi;

“sheikh maxamed jamaludiin al-qaasimi kutubtii uu qoray tiradoodu waxay garaysa 100 kitaab oo qaar yaryar iyo qaar waawenba leh, marka uu qoraalka bilabayay da’diisu waxa ay aheed 14 jir” sidookale caasim waxa uu sheeku ka sheegay qiso laga wariyay, waxanu yidhi;

“maalin malmaha kamid ah ayuu sheikh maxamed jamaludiin soo hor maray maqayad ay dhalanyaro badan fadhiyaan oo shah ay cabayan iyo haasawe mooye aysan waxkale ku mashquul saneen, kadib sheekhi

intuu dadki si murugo leh u jeedaliyay ayuu yidhi “waqtiga yaaka dhiga wax ay suurto gal tahay in lakala iibsado sababto ah kuwan dhamantood waqtiga ayan ka iibsan laha!”

Waxa layab ah ereygaan waanka iibsan laha” sheekhu ma waxuu ka murugooday luminta ay ku hayan waqtigooda mise waxa uu ubahna waqti inta uu heesto in kabadan ah si uu uqoro inta bug ee uu qoray inkabadan!?

Waxanba is leeyahay dadkas ayaba roona!!!

Bal kawaran haduu sheekhu joogi laha xilligan aan hader anag joogno? Ugu yaran muxuu nagu tilmaami laha!?

Intaas aan kuso gaba gabeeno culumadii hore iyo sida ay waqtigoodu uga faidesan jireen.

“NAFTAYDAAY IMAQAL HARAACIN WADADA QALDAN ADIGOO HELI KARA MIDA SAXDA AH”

Waxa jira go’aano badan oo naga leexin kara hadafyadeena anaga horteen waxa jiray dad ku jiray halgan siay diinta saxda ah inoo so garsiiyan anaga horteen waxa jiray dad u halgamay nafahooda si aysan adoomo unoqon anaga horteen waxa jiray halyeeyo uhalgamay siay inaga inoogu dhisan taarikh aan hadhow ku faano, anaga horteen waxa jiray sulaadiin kuwoodii ugu cadaalada badna anaga horteen waxa jiray kuwo diiday in anaga aan wayno meel aan ku hooyano.

Waayahe sababta aan anaga uga fikiri la’nahay kuwa inaga dambeeya mais waydiisay!?

Ana kuu haya jawabta; maxa yeelay anagu manihin kuwo u adag kuwii hore oo kale, anagu manihin kuwo rumeysan qadarta sida kuwi hore oo kale, anagu manihin kuwo u

halgama siaan loo burburin dhaqamadena iyo dintena maxa yelay xilligan la tagan yahay waxan ogolanay inaan noqono adoomo kaliya ka fikira 10 sano hada kadib waxa ayku noolan lahayeen!

- MARBA HADII UMAD AY ISBADALAAN CADOOYINKEDA WAXA BURBURA DHAMAN WAXA AYKU TIIRSAN TAHAY, WAXAYNA'ADOON UNOQOTA KUWA KALIITA.

“NAFTAYDAAY IMAQAL QOFNA HAISUGU DHIIBIN SI DHAMEESTIRAN”

Saaxiibkayow imaqal marba hadad qof isugu dhiibtid si dhamestiran illa xad uu awoodo inuu jabiyo go’aankaga,waxad dhexda ka istaagtay badwayn aan lahayn xeeb ana dakad aad ku dagto!

Marba hadii ay jiran dad aad u qadariso si xad’dhaaf ah,ayaguna aanku arkin xata dhexdooda iand tagan tahay oo aysan ku tirsan,ogow waxad gashay halis aad uwayn.

Marba hadii ay jiraan kuwo hadaladooda aadka hormarisid adiga hadalkaga,adigoo hadlaya aadka aamustid si ay iyaga u hadlaan ogow waxad ku dhex quustay badweeynta maxayelay waxa cad dadkaas inay saamen balaran ku leeyihiin adiga noloshada,xata ay awoodan inay badalan adiga shakhsiyadaada!

- saxiibkayoow qofna hasiini qadarin illa inta uu isagu ku siiyay maahe,nafsadadana hau liidin qof daraadii.

“NAFTAYDAAY IMAQAL OGOW KUWA GUULESTAY MAYSAN RAAXAYSAN”

Kuwa guulestay ee culimadii hore aha iyo kuwa hada joogaba siay u guuleestan waxa aysoo mareen xalado iyo dhibaatoyin kala duwan,waxa ayoo mareen xilliyo jiilal ah illa heer ay hada ka imaaden gu’a.

Waxay yeesheen taarikh dhameestiran oo ay illaliyeen saxnashada buuga taarikh doodu.

way dafreen habeeno badan markii ay dadku nasanayeen,way qadeen malmo badan markay dadku faraxsanayeen,way murugoodeen maalmo badan markay dadku ciidayeen!

Wayehe sideed ku doonesa naftaydaay raaxo aduun adigoo raba inaad la halganto mowjadaha bada!?

- ✓ Siaad uguulesato marka hore waa inaad waysa wax walbo oo aad jeceshahay.

"NAFTAYDAAY IMAQAL WANAAJI XIRIIRKA ADIGA IYO ALLE {SWT} IDINKA DHAXEEYA"

Marba hadad wanaajisid xiriirka adiga iyo rabigaa idin dhaxeeya,waad liibantay oo waxa aad ka mid noqotay kuwa uu alle u yaboohay.

Haduu waxagsan yahay xiriirka rabiga kagala dhaxeeya asaga ayaa wanajin doona xiriirka dadka kagala dhaxeeya.

Alle waa awood badane marva hadii anad dhankiisa usoo carareyn xilliyada dhibatada iyo xilliyada farxada,ma waxaad rabta inaad noqotid mid ku lumay dhul saxaro ah?

Alle asaga ayaa ku abuuray wuuna awooda inuu biyo kugu siiyo dhul qalalan dushiisa,wuu awooda inuu kuleel kugu siiyo dhul baraf ah dushiisa,wuu awooda

inuu hoos kugu siiyo dhul qoraxdu qalalisay.

Naxariis badanahaas hadii aanad wanajin xiriirkisa sideed ugu noolanaysa farxad?

Jawaabtu waa kuma noolan kartid!

"NAFTAYDAAY IMAQAL ISKA DAA WAXAN AAD KU MASHQUULAYSID WAXAAD LEEDAHAY RIYO KA DUWAN TAN AY AYAGU LEEYIHIIN!"

Naftaydaay adigu waxad leedahay riyo kaduwan tan ay ayagu leeyihiin,haku lumin waqtigaga inaad u rumayso ayaga riyookinkooga,hana ka tanasulin riyo aad adigu in badan ku haminaysay rumeenteeda.

Naftaydaay waad rumayni malintay ahataba lakin dadaal oo daruufaha nolosha uga gudub si wajahaad leh,

Marna quus haka istaagin waxad ku haminaysay maxayelay waxwalba dhamaadka ayay qurxoonadan.

“NAFTAAY IMAQAL ISTAAG MADAXAGANA KOR U QAAD UMA QALANTID INAAD HOOS EEGTO”

Qofnah yuusan kaa qajilsiin,qofnah yuusan ku dhigin meel hoose,qofna yuusan ku yasin,adigu waxad tahay nafsada loogu talo galay inay m,arwalba madaxeeda kor ahaado.

Qarniyaal kahor iyadoo dunida uuka jiro dagal aan dhamaad laheen,kuwo aya dagalkas dhexdiisa ka samestay taarikh,kuwo aya dagalkas dhexdiisa ka dhigtay cinwaanka buugooda.

Iyagu waxkasta uguma fududeen sida ay anagu hada inoogu fudud yihiin,waxkastana waxay ahayeen kuwo adag oo aan la isku dayi karin in lajilciyo,lakiin ayagu waxa ay noqdeen sidii birta ookale,waxa ayna u bareeren caqabadaha hortooda yaala.

KUWI USO HALGAMAY SIDAY DIINTA INOOGU SO GARI LAHEED

Ayagu waxa ay wajaheen xanuun midkii ugu darna,waxay u dulqaateen seefta xanuunkeeda iyo falaraha laabahoda ku dhacay.

Ma aysan haysan agab hormarsan sideeno kale,waxay u badnaayeen fuqaro gaajadu u dheertahay daruufo nololeed,xata maysan heli jirin wax ay cowradooda ku asturaan!

Alle haka raali noqdee hadaysan maanta usoo halgami laheen diintan qurxoon manaso gari laheen oo xiligan waxaynu ahan laheen kuwo lumay!

Alle haka raalinoqdee saxabadii rasuulka,haba ugu badnadaan kuwii qalinka inoogu soo halgamay iyo kuwii seeftaba waxay naga mudan yihiin ixtiraam heerki ugu sareeyay.

Sidookale kuwii taabiciinta aha oo iyagana boos wayn ka qaatay faafinta diiinteena,sidookale qof kastoo nafsadiisa u wayay ama halis u galiyay inay diintan nasoo garto waan u mahad celinayna nabadgalyo korkiin ha ahato.

KUWII QALINKA INOOGU SO HALGAMAY

Way badan yihin tiro malahan waxa jira kuwo magacyadooda la yaqaano iyo kuwo aan la’aqoon ba,qaar kamid ah qisadoda aanka waranno;

ABUU HURAYRA RC;

Waa saxabi kamid ah ahlu-sufaha waxa uuna yahay saxabiga ugu badan ee rasuulka scw ka wariyay xadiith,sidokale waxa uu aha mid fuqarada kamid ah oo ma haysan xata wax uu cowrdiisa ku qarsado,markuu nabigu ag fadhiyo wuxu cowradiisa ku qarsan jiray gunti yar oo uu watay ayuu iskuduubi jiray!

Alle haka raali noqdee wuu awooday inuu shaqeesto’oo uukamid noqdon maal qabeenada madiina lakin wuxuu uga tanasulay raaxo aduunyo inuu anaga nasoo garsiiyo diinta oo waxa uu ka fikiray jiilka

dhalan doona maxad dhaxal ahan uugu tagtaa!?

Wuxuu inooga tagay hubashii dhaxal aan laheen xad ama dhaxal aan laheen xisaab!

CABDULLAHI BIN CABAS RC

Sidookale isaguna waa saxabiga 2ad ee ugu xadiith warinta badan,

Asagoo yar ayuu aha mid aqli badan oo alle fahansiiyay waxwalba.

Maalin aya cabdullahi bin cabaas asagoo cunug yar ah cumar waxa uu uso kaxen jiray fadhiga odeyaasha,markaasay waydiiyen cumaroow wiilkan yar maxad fadhiga u dhex keentay,kolakasu cumar odeyaashi waydiiyay suaal oo wuxuu yidhi;

“maxad ka leedihiin suuratu-nasri ood ka fahansantihiin?”

Waxay ku jawabeen;”waxay ka hadleysaa fuutuxadka/furashooyinka islaamka iyo siday diintenu u balaranayso!”

Kolkasu cumar isla suashi u celiyay cabdullahi,cabdullahina wuxu ku

yidhi”suuradan waxay ka hadlaysa in nabiga geeridiisa soo dhabaatay!”

Cumar wuxu uga war celiyay” aniguba intaa baanka fahansanahay”

Taasi waxay cadeen u tahay wiilkan yar garashadiisa illa heerka ay garsii san tahay odeyashina sidas ayayba ku heleen jawabtooda!.

IMAM BUKHAARI

Imaam bukhaari waxa uu kamid yahay 4ta culimo uu gu waween,

Inbadan waxa uu safar aan kala joogsi laheen ugalay siduu cilmiga u uruurin laha,waxa una aha ardayga imam maalik.

Qiso yinkiisa hadan kawarano;

Khadhiib al-baqdaadi ayaa qisadan ku sheegay kitaabkisa la yiraadhdo TAARIIKHDA MAGALADA BAQDAAD isaga oo qisadan kasoo wariyay CUMAR AL-ASHQAR waxa uu yidhi;

”waqtiyadii uu bukkhaari ardayga aha waqti kamid ah ayuu dagay magalada basra ee kutaala dalka ciraaq,mudo dheer markii uu halkaa wax ka baranayay ayaa malin malmaha kamid ah laga wayay xalqadihii kasocday uu masajidadi uu wax ka baranayay,ardaydii ay wax wada baran jireen ayaa iswaydiisay meel uuku

dambeeyay,cid sheegta markii la wayay ayay saxabadii la noqotay inay kaso eegan gurigii uu dagana,waxayna u tagen isagoo gurigii dhex fadhiya,sababtuu u imanwayay masajidada markii ay suaaleen,ayuu ugu jawabay;"maryihii aan xirnaa aya iga dhamaday waxana wayay lacag aan ku iibsado waxan xirto!!"

Asxabtiisi isla goortiiba waxay isku xil qaamen inay u iibiyan ama siiyan wuxuu ku iibsado maryo uu xirto!

Waalayaab!imamkan aan hada kutubtiisa aqrisano si fudud waxa uuka soo maray hadad dib u jaleecdo waxad oganaysa inaysan fududeen inaad noqoto mid katag taarikh hadhow aan la illabin!.

“NAFTAYDAAY IMAQAL ADEEC WALIDKAGA”

Naftaydaay waxa jira kuwo badan oo ayaan daro ku dhacday katagid ayka tageen walidkooda iyo adeec la’aan bahsan oo ay ku faleen walidkooga.

Naftaydaay hanoqon mid illowda xanuunkay kaso mareen kolkaad yareed,hanoqon mid illowda fooshi dhimashada ku dhaweed ee ay hooyadada kuuso martay una soo adkaysatay xanuunkas siay adiga dunidan kugu soo biiriso oo ay kaadhigto tiir kamid ah tiirarka ay noloshu ku tagan tahay.

Naftaydaay waxbadan wayku so halgameen siay kaga dhigan mid tagan oo aanu cufna ku cuskan,adigana ha illobin abalkooga markad isu aragtay mid taagan oo aan la dhaqajin karayn.

Naftaydaay marba illa hada haday iyagu kula joogan waxad leedahay nasiib aysan dadku badana helin!

Istaag oo udhabar adeeg siaad iyaga uga dhigtid kuwa awoodleh kadib markay awoododii oo dhan ku dhameeyen siay adiga kuu istajiyan.

Ayagu uma qalmaan hoosen waxayna yihiin kuwo marwalba loo bahan yahay madaxoodu inoo kor ahado!

“NAFTAYDAAY IMAQAL DURUUFAHA MARNABA YAYSAN KU RIDIN AHOW SIDII BUURTO KALE”

Naftaydaay ahow sida buurta ookale!

U adkoow sida buurta ookale, buurahan waxay hayan dhulka sidookale ayagu ma’ahan kuwo isbadala sikastooy dabeelulu ugu dhacan, ma doorsooman midabadooda, mana noqdaan kuwo duqoobay, marwalba oo aad aktooda tagtana waxad u arkeysa sidii inay yihiin kuwo cusub oo aan waligoodba duugobin, sanado badan kadib hadad tagtid hadana isla sidii ay waagi hore ahayeen ayay yihin!

Waa inaad sidoodokale noqota hais badalin oo haiska badalin saxnaasho adigoo ku sugan.

Dadka dunidan kunool marwalba ma’arkan adiga wanagagaga,

Hadad cayilantahay waxay ku leeyihiin maad is cataysid?

Hadad cato tahay waxay ku leeyihin maad is cayilisid!?

Hadad gabantahay waxay ku leeyihiin tii/kii gabnaa!

Hadad dheerthayna waxay ku leeyihin dhirirka mafiicna!

Hadad hadal badantahay waxay ku leeyihin warbadana qofkan!

Hadad aamusnatana wuxu la'aamusanyahay waa xaasidnimo!

Hadad dhoola cadeen badantahay wuxu qosolbadana'afkiisuba isma qabto miyaa!?

Hadad qosolka iska yareesana wuxuu la qosli la'yahay waa cuqdad!

Waayehe ma dadkanad ka sugaysa inay mar qudhata xata kuu qiran waxa aad tahay?

May kuuma qirayan xata adad dhimanaysid waxbay ka sheegayan,

Kuwo adiga kaa sharaf badan ayay dhaleeceyen, nabiyadii dunidan so maray majiro nabi aan lagu dhihin wax qalbigiisa gilgila, qaar waxa ayku tilmaameen sixirooleyaal! qaarna waxa ayku tilmameen kuwo walan inay yihiin, qaarna waxa ayku tilmaamensifooyin uusan qof nooli u adkaysan Karin in lagu tilmaamo.

Makuwasad ka sugaysa inay ku qiraan waxad taay!?

Xata alle {swt} ayay u gafeen oo ayku tilmaamen mid oori leh oo wiil dhalay!

Alle quraankisa wxa uu nagu sheegay inuu san jirin qof isaga u dhigma uusan dhalinna isgana aan la dhalin.

Ayagoo og waxwalba ayay alle u gafeen sided ku sugaysa inay adi kuu noqdan kuwo ku adeeca aana kaa sheegin sababyar oo xumantada ah!?

- Hasugin inay wax kaa sheegin, maxayeelay waxay wax kasheeyen kuwo adiga kaa sharaf badan.

"NAFTAYDAAY IMAQAL QOFNA HAIS BARBARDHIGIN"

Naftaydaay qofna hais barbardhigin maxa yeelay mugdiga iyo iftiinka isku mid marna manoqon karan,yeeyga iyo dacawada isku mid manoqonkaran,bada iyo wabigana isku mid manoqonkaran!

Majiro qof adiga kuula mid ah waxad tahay sidii dayaxi ookale,sida buurti oo kale, sidii libaaxi oo kale,majiro qof leh adiga dabeecadada oo kale,majiro qof leh adiga dhaqankaga oo kale mana jiro qof leh adiga awoodada oo kale!

Waxad tahay qofka kaliye ee haysta wax kasto uu' ubahan yahay,qofna uma baahnid oo aan rabiga ahayn.

“NAFTAYDAAY IMAQAL NOQO MID GO’AAN ADAG”

Naftaydaay go’aanadada hau adkan sidii birta oo kale yaysan jirin lalalabeen adiga dhankaga ahatay,marba hadad rabtid sheey inaad qabato marwalba ku dhaqaaq go’aanka ugu horeeya ee kugu soo dhaca,hadad wax ka labolabeysid qabantooda ogow inaad kala kulmaysid guul daro!

Adiga laguuguma talo galin inaad ka shakido go’aan aad mar qadatay,ufiirso badana sheyada mar aaka labolabaysid badana dhamaadkooda waa guul daro!

Mais waydiisay sababta?

Sababta waa marka hore sheygaa inaad sida saxda ah aad go’aankisa u qadatay lakin shakigas yar ee ku galay uu qalqalgaliyay sugnashaha maskaxdada kadib aadka labato go’anki saxsana aadna qadato mid qaldan.

“NAFTAYDAAY IMAQAL NOQO MID LEH KALSOONI KU FILAN”

Badana waxan aragna kuwo badan oo daruufaha nolosha la daala dhacaya,sidokale malin walba waxan la kulana kuwo umuuqda inay liidan yiiin,lakiin barta ayaga is dhigay.

Noqo mid leh kalsooni badan siaad dadka dhexdooda ugu muuqato,waa hubaal malin un inaad is tidhi alla qofkan wuu ka wanagsanyahay ama wuuka qurxan yahay!

Maya!taasi waa malo qaldan,majiro qof ka wanagsan mana jiro qof ka qurxan ku dheh naftada isla markaas aad ku fikirtay waxas qaldan.

- Kalsoonidu waa tiirka kaliya ee aad cuksan karto xilliyada dhibatoyinka.

“NAFTAYDAAY IMAQAL KAMUUQO DUNIDAN OO WUXUUN KA NOQO!”

Waxa jira kuwo badan oo manta dunidan laga ixtiraamo,xata waxa ku jira oo ugu waaween kuwo aan waligood wax baran iyo kuwo waxbarashada dhex ugu tagay!

Maiswaydiisay sababta ay guulahas ku gaaren iyagoo anan waxbaran!?

Mais waydiisay sababta adigoo wax bartay aad u noqon la’dahay ayaga oo kale?

Waatan jawaabta;

Ayaga waxay fahmeen sheeyada ayku wanagsan yihiin qabantooda,sidookale waxay fahmeen xirfada gudahooda kujirta,way isku dayeen dibada ayayna usoo sareen!

Adigu waxa laga yaba inuu alle kuu fududeeyay hal shey siduu nabi daauud ugu fududeeyay xadiidka,waxa laga yaba inay kugu dhex jiraan xirfado kabadan inta aad haminaysid.

Isku day inaad dibada uso sarto,isku day inaad noqoto tiir kamid ah tiirarka ay dunidu ku tagan tahay.

“NAFTAYDAAY IMAQAL HADHAGEESAN IYAGA”

Mararbadan waanku dhageestay qalbigaygana dhaawacisa muusan bog san,ma’aqaan sababta u wada jeceshihiin marwalba inaad murugoodo lakin waxan huba inan ahay mid daciif ku noqotay ereyadiina qalafsan,ma’awoodo intaan kabadan inaa idin dhageesto,haa ma awoodo!

Inaan isaga kiin indho tiro oo hadaladiina kaso qaado inaadanba dhihin aya ii wanagsan.

Hada kadib ma’ahan doooni qofkii hore ee aad taqaneen,waan isbadalay waxana isku badalay adinka dartiin,waxan iska dhigaya dhagool aan waxmaqlaynin oo kale anigoo maqlayo waxkasta oo aad leedihiin!

“NAFTAYDAAY IMAQAL HA DHAYALSAN DUCADA KAN DULMAN”

Naftaydaay waxa jira mid rabigii hortagan markaad adigu hurudo oo rabigii usheeganayo dhibatooyinkiisa.

Naftaydaay iska illali inaad qof dulmiso xata hadad awood uleedahay inaad wax dulmiso!

Naftaydaay iska illali ducada kan alle aktiisa ku ilmeenaya xilli aad adiga hurudo oo aysan nafi kugu jirin!

Naftaydaay alle mararbadan ayuu qurankiisa ku sheegay nafta wax dulmisa inuu hoygeeda ahan doono cadan wax xanuunjiya,adigoo og ayadaha illahay uu in badan ku xusay maxad u dulminaysa masakiin aan awoodin inuu iska ka dhiciyo!?

- ✓ Dulmi hafalin xata hadad awoodo inaad wax dulmido.

“NAFTAYDAAY IMAQAL ILLALI WAJIBADKA ALLE UULU SARAY”

Nafyahay daciifka ah illali wajibadka uu alle {swt} ku saaray,illali xaq walba oo uu alle kugu leeyahay.

Nafyahay daciifka ah ma waxad ka tagaysa salaad aad ku hor istaagi laheed rabiga una sheegi laheed inaad isaga kaligii caabudid,aad waydiisan laheen kaalmo inuu ku siiyo sidookalana aad waydiisan laheed inuu kugu hago wadada xaqa/wadada kuwa loo nimceeyay?

Ma waxad ka tagaysa inaad caawisid kan ka hooseya,sida dadkeen hadaba ay sameeyan!

Waxa jirta maahmaah leh;”NINKII QURAAC HAYSTA QADO LOOGU DARA!!”

Anu waan layabay ujeedka maahmaahdan lakin waa mid ka turjumaysa umadan hada nool,maba eegan kan kahooseya marwalba

waxay caawiyan kuwa ka sareeya ee aan cawinada ugu baahneen!

“NAFTAYDAAY IMAQAL KU DAYO KUWA WANAGSAN”

Kudayo marwalba kuwa wanagsan maxa yeelay ayagu kuma seejinayan waxna,ku dayo kuwa wadada alle usoo dagalamay siaad ugu heshid geesinimo dhameestiran,kudayo kan sheekha ah ee masjidka fadhiya siuu dinta alle ufaafiyo maxa yeelay aktiisa kuma qasaraysid aaqiro iyo aduunba.

Ku dayo khulafadii muslimiinta ee noola cahdiyadii hore maxa yeelay waxay heesteen qalbi ka adag keena,sidookale waxay heesteen qanacsanan dhameestiran xata ayagoo la’aa sadax malin waxay cunana ama dhar ay xirtaan!

- ✓ Ku dayo qof kasta oo wanagsan siaad adigana unoqoto qof wanagsan.

DHAMAAD